

## Hagaajinta Caanaha (NeoSure®)

### Maxaan ugu baahanahay inaan hagaajiyo kalooriyeyaasha ku jira caanaha ilmahayga?

NeoSure® waa nafaqo qani ku ah caanaha si gaar ah loogu sameeyay dhallaanka dhicisoobay markay guriga aadaan ka dib. Habkani waxa uu caawiyaa koritaanka "qabsashada", oo ay ku jiraan miisaanka, dhererka iyo wareegga madaxa. NeoSure® sida caadiga ah waxa ku jira 22 kalori halkii wiqiyadood, laakiin dhallaanka qaarkood waxa laga yaabaa inay u baahdaan heer kaloriyo ka duwan si ay u helaan miisaanka saxda ah.

### Sideen isku daraa caanaha?

1. Gacmaha si fiican ugu dhaqo saabuun iyo biyo. Dhaq dusha sare ee qasacadda caanaha formula ka hor inta aadan furin si aad uga ilaaliso in jeermisku u gudbo masaasadda. Isticmaal weelasha cabbiraadda oo nadiif ah iyo weel.
2. U daa biyaha qasabadda qabow inay socdaan 2 daqiiqo ka hor inta aanad ku darin caanaha si aad u nadiifisid biyaha fadhiya tuubooyinka. Biyaha ceelka waxa ku jiri kara bakteeriyo mana aha in loo isticmaalo samaynta caanaha dhallaanka.
3. Fiiri shaxda cunto karinta ee ku taal gadaasha xaashidan. Isticmaalka koob cabbirka dareeraha cad, cabbir qiyaasta biyaha la rabo. Meel siman dhigo koobka wax lagu cabbiro, oo adigoo gaarsiinaya indhaha iska hubso heerka caanaha.
4. Cabbira baakad la'aan, qaaddo heersare ah, koobabka wax lagu cabbiro, ama malqacadaha cabbirka budada caanaha. Ku dar budada biyaha. Isticmaal qaado oo kaliya ee ku jirta qasacadaha caanaha ama koobabka cabbirka ee loogu talagalay maaddooyinka engegan.
5. Isku qas ama si fiican u rux ilaa ay burooyinku ka baxaan.

### Ilaa intee ayaan sii haysan karaa caanaha?

Ku kaydi caanaha la diyaariyey weel daboolan qaboojiyaha. Tuur caanaha la diyaariyey ee aan la isticmaalin 24 saacadood ka dib.

Tuur wixii budada caanaha ah ee aan la isticmaalin hal bil kadib markaad daasadda furto.

### U diyaargarowga quudinta ilmahaaga

1. Si fiican u rux caanaha.
2. Diiri caanaha adiga oo dhalada ku dhejiya biyaha diiran.  
**Ha samayn** isticmaal microwave-ka sababtoo ah waxay u kululaataa si aan sinnayn, taasoo keenta "dhibacyo kulul" oo gubi kara afka ilmaha
3. Diirinta ka dib, rux dhalada mar kale.  
**Had iyo jeer** tijaabi heerkulka caanaha ka hor quudinta.
4. Tuur caanaha ee ku haray dhalada ilmaha quudinta ka dib.

## NeoSure® Shaxda cunto karinta

Kalooriyada halkii wiqiyadood	Biyo	Budada caanaha (aan xirnayn, heer)	Qiyaas ahaan mugga ugu dambeeya
<input type="checkbox"/> 20	2 wiqiyadood (¼ koob)	1 qaadada miiska + 1 qaadada shaah	2¼ wiqiyadood
	3 wiqiyadood	2 qaadada miiska ah	3½ wiqiyadood
	9 wiqiyadood	4 qaado	10 wiqiyadood
	17 wiqiyadood	½ koob + ¼ koob	19 wiqiyadood
	23 wiqiyadood	1 koob	25½ wiqiyadood
<input type="checkbox"/> 24	3 wiqiyadood	2 qaadada miiska + 1 qaadada shaah	3½ wiqiyadood
	5½ wiqiyadood	3 qaado	6 wiqiyadood
	9 wiqiyadood	5 qaado	10 wiqiyadood
	14 wiqiyadood (1¾ koob)	½ koob + ¼ koob	16 wiqiyadood
	19 wiqiyadood	1 koob	21½ wiqiyadood
	24 wiqiyadood (3 koob)	1 koob + ¼ koob	27 wiqiyadood
<input type="checkbox"/> 26	2½ wiqiyadood	2 qaadada miiska + ½ qaadada shaaha	3 wiqiyadood
	3½ wiqiyadood	3 qaadada miiska + 1 qaadada miiska	4 wiqiyadood
	5 wiqiyadood	3 qaado	5½ wiqiyadood
	13 wiqiyadood	½ koob + ¼ koob	15 wiqiyadood
	17 wiqiyadood	1 koob	19½ wiqiyadood
	23 wiqiyadood	1 koob + 1/3 koob	26½ wiqiyadood
<input type="checkbox"/> 27	95 ml	2 qaado	3½ wiqiyadood
	8 wiqiyadood (1 koob)	5 qaado	9 wiqiyadood
	11 wiqiyadood	1/3 koob + 1/3 koob	12½ wiqiyadood
	16½ wiqiyadood	1 koob	19 wiqiyadood
	21 wiqiyadood	1 koob + ¼ koob	24 wiqiyadood
	25 wiqiyadood	1 koob + ½ koob	29 wiqiyadood
<input type="checkbox"/> ____			

1 Qaadada miiska ah = 3 qaadada shaaha ah

**Fiiro gaar ah:** Si aad u samayso caanaha 22 kalori-wiqiyadood, raac tilmaamaha ku yaal qasaca.

### Su'aalo?

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, wac Adeegyada Nafaqada ee isbitaalkaaga saacadaha maalintii.  
 Children's Minneapolis (612) 813-6865 ama (612) 813-6960 (NICU)  
 Children's St. Paul (612) 220-5678